



Ku soo dhaaow hooygaaga cusub

Wax fudud ma han in laguuro. Marka loo guuro guri cusub shaqo badan ayaa laqabtaa. Waxaa suura gal ah in alaab muhiima ay ku dhunto geedigaas. Haddii uu kaa dhumo Kaar ka cod-bixinta iyo haddii kaleba waxa aad u baahantahay inaad saxdo, oo aad cusbooneysiisid akhbaartaada oo ay ku jirto ciwaanka gurigaaga cusub.

Arji is-diiwaan gelin codaynta ah ayaa ku jira macluamadkan. Is-diiwaan geli maanta si aad ugu diyaargarowdo doorashooyinka soo socda. Waxaad samayn kartaa inaad :

- Buuxiso Arjiga la socda warqaddan kuna dir boosta
- Buuxiso is-diiwaangelin internetka ee bogga cinwaankiisu yahay: vote.minneapolismn.gov/renter.

Waxaad is-diiwaan gelin kartaa kana codayn kartaa Minnesota haddii aad tahay:

- Muwaadin Maraykan ah.
- Maalinta codaynta da'daadu tahay ugu yaaraan 18 sano.
- Haddaad degantahay Minnesota ilaa 20 casho ka hor maalinta codaynta.
- Haddad dhamaysatay gebi ahaan xukun danbi aad u xidhnayd .
- Ka fiiri shuruudaha codaynta oo dhan boogan: vote.minneapolismn.gov

Taariikhaha doorashada ee muhiimka ah in la ogaado 2018

Doorashada Hore-u-dhaca ah	Doorashada Guud
<ul style="list-style-type: none"> • Talaado, 14-ka Ogoosto • Waraaqaha dadka maqan waxaa la heli karaa laga bilaabo Jimcaha, 29-ka Juun. • Hore Isdiiwaangelintu waxa ay ku egtahay Talaadada, 24-ka Julaay.* 	<ul style="list-style-type: none"> • Talaado, 6-da Noofember. • Waraaqaha dadka maqan waxaa la heli karaa laga bilaabo Jimcaha, 21-ka Settember. • Hore Isdiiwaangelintu waxa ay ku egtahay Talaadada, 16-ka Oktoobar*

*Haddii ay ku dhaafto maalinta u danbaysa ee is-diiwaan gelinta hore, weli waad is diiwaan gelin kartaa oo codayn kartaa maalinta doorashadu dhacayso. Boogan ka fiiri caddaymaha lagaaga baahan yahay ciinwaankaaga iyo oqoonsigaaga: vote.minneapolismn.gov/voters/ELECTION-DAY-REGISTER . Haddii aad xili hore is diiwaan galiso, waqti kaama dhumayo, umana baahanaysid inaad la timmaado warqado aqoonsi dheerad ah.

Wixii macluumaad dheeraada ah oo ku saabsan doorashooyinka iyo codaynta:

Booqo bogga internetka doorashooyinka iyo codaynta ee magaalada Minneapolis:

vote.minneapolismn.gov

ama 311 :

www.minneapolismn.gov/311

Arjiga Diiwaangelinta Codbixiyaha Minnesota

Arjigaaga ku gudbi bogga internetka mvotes.org ama Buuxi sadarada 1 ilaa 8 ee foomkan. Fadlan si fasiix ah u qor.

Macluumaadka Qofka & u Qalmidda

Somali Voter Registration 2016

1. Ma tahay muwaadin Maraykan ah? Haa <input type="checkbox"/> Maya <input type="checkbox"/>		election office use only IP M AB	
2. Ma jiri doontaa ugu yaraan 18 qatiga doorashada soo socota ama ka hor? Haa <input type="checkbox"/> Maya <input type="checkbox"/>			
Haddii aad calaamadayso "Maya" labada su'aalood middood, HA buuxin foomkan.			
3. magaca dambe ama awoowaha	magaca koowaad	magaca dhexe (aabaha)	magaca la raaciyoo (Jr., Sr., II, III)
4. cinwaanka meesha aad ku nooshahay (guriga)		qolka (apt.)	magaalada
		lambarka boostada (zip code)	
5. haddii aan boostada la gayn karin cinwaanka kore, sheeg P.O. Box		magaalada	lambarka boostada (zip code)
6. taariikhda dhalashada (ma aha taariikhda maantay)	dugsiga degmada (haddii la yaqaan)	degmada aad ku nooshahay	
lambarka taleefoonka		cinwaanka emailka	
7. calaamaday hal sanduuq sheegna lambarka ku saameeya:			
<input type="checkbox"/> Waxaan leeyahay shati dareewal oo MN ay bixisay ama warqad aqoonsi oo MN bixisay lambarkeeduna yahay:			
<input type="checkbox"/> Ma lihi shati dareewal oo MN bixisay ama Warqad Aqoonsi oo MN bixisay.			
Afarta lambar oo u dambeeyaa Sooshaal Sikuuradkayga waa:			
<input type="checkbox"/> Ma lihi shati dareewal ee MN, Warqad Aqoonsi ee MN ama Sooshaal Sekuurad Lambar.			

Wax ka beddelidda Isdiiwaangelinta - Hadda ma waxaad ku diiwaangashan tahay magac ama cinwaan aan kii hore ahayn?

magaca dambe ee aad markii hore lahayd	magaca hore ee aad markii hore lahayd	magaca dhexe ee aad markii hore lahayd
cinwaankaagii hore ee aad ku diiwaangashanayd	magaalada	gobolka
		lambarka boostada (zip code)

Akhri oo Saxiix Kaliya Haddii Dhammaan Qaybuhu ku Saameeyaan Adiga.

8. Waxaan caddaynayaa in:

- aan noqon doono ugu yaraan 18 sano jir maalinta doorashada;
- aan ahay muwaadin Maraykan ah;
- aan ku noolaa Minnesota 20 maalmood oo ka horeeya maalinta doorashada;
- aan degganaan doono cinwaanka ku yaal arjigan;
- aanan amar maxkameed cidna ku hoos joogin kaasoo igala noqonaya xaqayga codbixinta;
- aanan maxkamadi xukumin in sharci ahaan aanan codayn karin;
- aan xaq u leeyahay in aan codeeyo sababtoo ah, haddii la igu xukumay dembi culus, waa dhacay waqtigii dembigaas culus (waa la dhammaystiray) ama waa la iga dhaafay ciqaabta xukunkii igu dhacay; iyo
- aan akhriyay fahmayna caddayntan, in macluumaad been ah la sheego ay tahay dembi culus ciqaabtiisuna noqon karto xarig aan ka badnayn 5 sano, ganaax aan ka badnayn \$10,000, ama labadaba.


saxiix halkan: **X** _____ taariikhda: _____ - _____ - **20** _____

Election Judge Official Use Only

W _____ P _____ SD _____ Initials _____	ID with Current Name & Address ID Number: _____ <input type="checkbox"/> MN Driver's License, Learner's Permit, MN ID Card, or Receipt <input type="checkbox"/> Tribal ID Card	Photo ID + Document with Current Name & Address Document Type: _____ Photo ID Number: _____ <input type="checkbox"/> Driver's License, Learner's Permit or State ID Card <input type="checkbox"/> U.S. Passport <input type="checkbox"/> Tribal ID <input type="checkbox"/> U.S. Military or Veteran ID <input type="checkbox"/> Student ID	Other <input type="checkbox"/> Vouched For <input type="checkbox"/> Notice of Late Registration <input type="checkbox"/> Valid Registration in Same Precinct <input type="checkbox"/> Student ID with College List ID Number: _____
--	--	---	---

Boostada ku soo dir ama adigu keen foomkan:

Secretary of State
60 Empire Drive
Suite 100
St. Paul, MN 55103



Macluumaadka ku saabsan waqtiyada kama dambaysta ah

Waxaan kugu dhiiri gelinaynaa in aad isdiiwaangelisid ka hor Maalinta Doorashada – Waqti ayay kuu badbaadinaysaa maka aad timaadid goobta codbixinta. Waqtiga kama dambaysta ah ee aad horay isdiiwaangelin kartid waa 21 maalmood ka hor Maalinta Doorashada. Haddii kale, waxaad Maalinta Doorashada iska diiwaangelin kartaa goobtaada codbixinta. Booqo mnvotes.org si aad u ogaatid dukumiintiyada iyo/ama aqoonsiga aad u baahan tahay in aad la timaadid.

Arji cid-saddexaad ay keento waa in uu qabtaa Xafiiska Xoghayaha Gobolka (Office of the Secretary of State), ama xafiiska doorashada ee degmada codbixiyaha, 10 maalmood gudahood laga bilaabo maalinta codbixiyuhu saxiixay taariikhdana uu ku qoray arjiga.

Gargaar

Arjiyo far waaweyn ku qoran ayaa laga heli karaa marka laga codsado Hubiyaha Degmadaada (County Auditor) ama Xafiiska Xoghayaha Degmada. Gargaar gaar u ah dadka da'da weyn, itaalka daran, ama ku jira xarumaha daryeelka caafimaadka ayaa la heli karaa. La xiriir Xafiiska Xoghayaha Gobolka Minnesota ama Hubiyaha Degmadaada wixii macluumaad dheeraad ah. Arjiyada oo afaf kale ku qoran waxaad ka heli kartaa mnvotes.org.

Ogaysiiska Asturanaanta

Taariikhda dhalashadaada saxda ah, cinwaanka emailkaaga, iyo wixii lambaro aqoonsi ee aad bixiso (Shatiga dareewalka Minnesota, Warqadda Aqoonsiga ee gobolka ama afarta lambar ee ugu dambeeya Sooshaal Sikuuradka) waa asturanyihiin. Saraakiisha doorashada iyo hay'ada dawladeed oo loo idmay kaliya ayaa macluumaadka heli kara.

Saraakiisha doorashadu waxay u isticmaalaan taariikhda dhalashadaada saxda ah iyo lambarkaaga aqoonsiga in ay ka xaqiijiyaan aqoonsigaaga Minnesota Department of Public Safety (Waaxda Nabadgeliyada Bulshada ee Minnesota) ama Social Security Administration (Maamulka Sooshaal Sikuuradka). Haddii aad leedahay Warqad Aqoonsi laakiin aad diidid in aad lambarka bixisid, arjigaagu ma dhammaystirmayo, waxaana laga yaabaa in aad codsato mar labaad ama aad tustid caddayn deganaansho inta aadan codayn.

Saraakiisha doorashadu waxay kuu waydiiyaan emailkaaga si ay kaagala xiriiri karaan arrimaha arjigaaga. Sidoo kale, Xafiiska Xoghayaha Gobolka ayaa kuu soo diri kara email (ama si kale kuula xiriiri kara) taas oo ku saabsan arrimaha codbixinta iyo doorashada, ama ku weydiin kara ra'yiga bulshada ee ku saabsan codbixinta iyo doorashada.

Inta kale ee ah macluumaadka ku qoran arjigaaga waa mid dadweynaha u furan marka loo isticmaalo doorashada, siyaasadda ama ujeedooyin nabadsugid ama arrimaha la xiriira xulista xeerbeegta (Jury). Haddii aad doonaysid in macluumaadkaaga xiriirka ay asturnaadaan ama qarsoodi ahaadaan sababo amni awgeed, wac 1-877-600-8683 si aad u ogaatid waxa aad samayn karto.

Macluumaad Dheeraad ah ee ku Saabsan Codbixinta

Wixii ah macluumaad intaa ka badan ee ku saabsan codbixinta, isdiiwaangelinta si loo codeeyo, meesha ay tahay goobtaada codbixintu, natiijooyinka doorashada gobolka, macluumaadka ku saabsan ololaha doorashada, ama sida loo qabanayo doorashooyinka, tag bogga internetka ee Xoghayaha Gobolka Minnesota (Minnesota Secretary of State) oo ah mnvotes.org ama lacag la'aan ku wac 1-877-600-VOTE (1-877-600-8683). Wixii ah isgaarsiinta TTY/TTD (Dadka dhegoolka ah iyo kuwa dhegaha culus), la xiriir Minnesota Relay Service (Adeegga War Laliska Minnesota) 1-800-627-3529 ama 711.